NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Jadeecada
# Measles (Somali)

Jadeecada (rubeola) waa caabuq uu keeno jeermis (fayras). Waxay kaa dhigeysaa inaad xanuunsato muddo gaaban waxayna kuu keeni kartaa dhibaatooyin caafimaad oo halis ah mustaqbalka.

## Sida Ay Ku Faafto

Jadeecadu si fudud ayay qof ka qof ugu faaftaa (waa cudur si sahlan u faafa). Tani waxay dhacdaa marka qof qaba jadeecada uu qufaco ama hindhiso, fayraskuna uu ku faafo hawada ama meelaha la taabto. Fayrasku wuxuu gala indhahooda, sanka, ama afka marka ay neefsadaan ama ay taabtaan. Fayrasku wuxuu ku noolaan karaa hawada iyo meelaha adag dhowr saacadood. Calaamadaha sida caadiga ah waxay ku soo ifbaxaan 8 ilaa 12 maalmood kaddib marka qofku uu u beylah noqdo fayraska.

- Badanaa, qofka cudurka uu ku dhacay ma oga ineey qabaan jadeeco ilaa ay ka jiradaan.
- Jadeecadu waxay ku faafi kartaa kuwa kale 4 maalmood ka hor ilaa 4 maalmood ka dib marka ay finanku soo baxaan.

## Kuwa Kujira Halista Ugu Sarreysa

Jadeecadu aad bay khatar ugu tahay dadka qaar. Dhibaatooyinka caadiga ah waxaa ka mid ah caabuqa dhagaha iyo saxaro jilicsan (shuban). Waxay keeni kartaa dhibaatooyin halis ah, sida oof-wareen ama barar maskaxda ah (encephalitis).

Kuwa kujira halista ugu badan in ay qaadaan xanuun halis ah waa:

- Carruurta yaryar (da'doodu ka yar tahay 5 sano)
- Dadka waaweyn ee ka weyn 20 sano

 ©2009, dib loo eegay 2025, Nationwide Children's Hospital Sii socda…

- Dadka uurka leh
- Dadka leh difaac jidh oo daciif ah (nidaamka difaaca jirka oo hooseeya)

## Calaamaddaha iyo Astaamaha

- Astaamaha hore (maalmaha 1 ilaa 4):
  - Qandho
  - Qufac
  - Sanka oo dareeraya
  - Indhaha oo leh biyo cas
  - Baro casaan yaryar oo leh xuddunno caddaan-buluug ah oo gudaha dhabannada ah
- Astaamaha dambe (maalinta 4 ama wixii ka dambeeya):
  - Finan ayaa soo baxa
  - Qandho daran (104˚ Fahrenheit (F), 40˚ Celsius (C) ama ka badan)
- Finanka jadeecada
  - Wuxuu ka bilaabmaa wejiga, dhegaha gadaashooda, iyo timaha agtooda. Wuxuu ku faafi doonaa jidhka intiisa kale ilaa cagaha muddo 3 maalmood gudahood.
  - Marka hore finanuhu waxay u ekaanayaan kuwo siman, ka dibna baro kor u taagan ayaa soo baxa. Markuu ku fidayo, baruhu waxay isu beddeli doonaan koox-koox. Kooxahaas baraha ah waxay isugu biiri doonaan si ay u sameeyaan meelo waaweyn oo casaan ah.
  - Finanku waxeey sii jiraan 3 ilaa 5 maalmood. Si tartiib ah ayeey ugu libdhi doonaan midab bunni ah, iyadoo marka hore ka soo bilaabmi doonta wejiga u sii gudbi doontana dhankaa iyo qeybaha hoose ee jidhka. Maqaarka waxaa laga yaabaa inuu diirsamo.

## Ka Hortaga

Sida ugu fiican ee looga hortagi karo jadeecada waa in si buuxda lagugu tallaalo tallaalka jadeecada, bofiska, iyo rubellada (MMR).

- Laba tallaal (qiyaasood) ayaa loo baahan yahay si lagugu tallaalo si buuxda.
  - Kuuraha 1-aad waxeey qaadanyaan ka dib sannad guuradooda koowaad ee ka soo wareegtay dhalashadood (12 ilaa 15 bilood jir).
  - Kuuraha 2-aad ka hor inta aan la gelin dugsiga xanaanada (4 ilaa 6 sano jir).
- Qof kasta oo aan laga ilaalin jadeecada ayaa halis u ah ineey ku dhacdo. Dadka intooda badan ee qaba jadeecada gudaha Maraykanka waa kuwa aan si buuxda loo tallaalin.
- Haddii aad u safrayso dibadda, Xarunta Xakamaynta Cudurrada (CDC) waxay kugula talinaysaa in tallaalka MMR loo bilaabo dhallaanka da'doodu tahay ugu yaraan 6 bilood.

La hadal dhakhtarka ilmahaaga ama adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka ka hor intaadan safrin.

- Fitamiin A kama hortago cudurka jadeecada.

## Daaweynta

- Maadaama jadeecadu ay tahay fayras, antibiyootigyadu waxba kama tari doonaan.
- Sii ilmahaaga dareero badan iyo nasiino.
- **Waligaa ha siin ilmagaaga waxyaabo ay ku jirto aspirin ilaa uu dhakhtar ku faro.**
- Sii daawada qandhada jabinaysa, sida acetaminophen (Tylenol®), marka loo baahdo. Kahor intaadan qaadan ibuprofen (Motrin® ama Advil®), kala tasho dhakhtarkaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka si loo hubiyo inay kugu habboon tahay. Raac dhammaan tilmaamaha garoojada ee ku qoran baakadkaa.
- Calaamaduhu sida caadiga ah waxay ku baaba'aan illaa 2 toddobaad iyada oo aan la daaweynin. HA iska indho tirin astaamaha sii xumaanaya. U sheeg dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aanu ka soo raynayn.
- Haddii ilmahaagu qabo jadeeco daran, waxaa laga yaabaa in loo baahdo in isbitaal loo dhigo si loo daweeyo. Haddii uu jiro caabuq bakteeriya ah oo dheeraad ah, sida oof-wareen ama caabuqa dhagaha, waxaa la siin doonaa antibiyootiko.

## Goorta Ay Tahay in La Waco Dhakhtarka

La soo xiriir dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad u malaynayso inuu qabo jadeeco. Samee tan **kahor** intaadan ilmaha keenin ama tagin isbitaalka. Ma rabtid inaad u gudbiso dadka kale.

Aad bay muhiim u taha in aad la xiriirto bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ilmahaaga haddii uu la kulmay jadeeco iyo haddii:

- Waa dhallaan (da'diisu ka yar tahay 12 bilood).
- Aanu weli la tallaalin (aanu helin tallaalladooda).
- Uuna leeyahay habdhiska difaaca jirka oo daciifay sabab jirro ama dawooyinka ay qaataan awgood.
- Ay ka muuqdaan calaamado la mid ah kuwa jadeecada.

## Goorta Ay Tahay In La waca 911

Wac 911 haddii aad u malaynayso in ilmahaagu uu qabo jadeeco ama uu leeyahay:

- Dhibaatooyinka neefsashada
- Neefsasho degdeg ah
- Afka hareerihiisa oo buluug noqda
- U egyahay mid aad u xanuunsan
- Maqaarka oo nuugma inta u dhexeysa feeraha marka uu neefsanayo (hoos u jiidmid)

## Kulaabashada Dugsi ama Daryeel Sii-hayn Ilmo

- U sheeg iskuulka ilmahaaga ama xarunta xannaanada haddii uu qabo jadeeco. Kiisaska jadeecada waa in lagu soo war-geliyaa waaxda caafimaadka ee deegaanka.
- Carruurta qaba jadeecada waa inay ka fogaadaan dadka kale, oo aysan tagin dugsiga ama xannaannada carruurta ilaa shan maalmood ka dib markii finanadu soo baxeen.